

Ilmo damer ah



✎ Lindiwe Matshikiza

📧 Meghan Judge

📖 Anwar Mohamed Dirie

😊 somali

|| nivå 3

Barnebøker for Norge

barnebok.no

Ilmo damer ah

Skrevet av: Lindiwe Matshikiza

Illustrert av: Meghan Judge

Oversatt av: Anwar Mohamed Dirie

Denne fortellingen kommer fra African Storybook (africanstorybook.org) og er videreformidlet av Barnebøker for Norge (barnebok.no), som tilbyr barnebøker på mange språk som snakkes i Norge.

Dette verket er lisensiert under en Creative Commons

[Navngivelse 4.0 Internasjonal Lisens.](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no)

<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/deed.no>



Gabar yar ayaa aragtay muuqaal aan la garaneyn oo masaafo ka muuqdo.

Markii uu muuqaalki soo dhawaday,
waxa ay aragtay in ay tahay haweeney
xaamilo culus ah.





Xishood laakiin geesi nimo, gabadhii waxa ay ku sii dhowaatay haweeneydii. “Waa in ay nala joogtaa,” ayay gabadha dadkeedii go’aansadeen. “Iyada iyo ilmaheedaba waa aannu nabad gelinaynaa.”



Ilmihi dameerka ahaa iyo hooyadii waa ay wada koreen waxa ayna heleen qaabab badan oo ay ku wada noolaan karaan midba midka kale dhiniciisa. Tartiib tartiib, dhinacyadooda oo dhan, qoysas ayaa bilaabay in ay soo dagaan.



Ilmaha ayaa soo dhakhso ba wadada soo
galay. "Rixi!" "Bustayaal la kaalaya!"
"Biyo!" "Rii!!!xxxxx!!!"



Damerki! waxa uu helay hooyadii, oo
cidlootay una barooranaysa ilmahedi!
lumay. Muddo dheer ayay is eegteen
midba midka kale. Dabadeedna ihabisi
siiyen waliba si adag.



Laakiin markii ay ilmihii arkeen, qof walba gadaal ayuu argagax ugu booday.
"Dameer?!"



Ugu dambeyntii dameerkii waa uu ogaaday waxa in la sameeyo ah.



... daruurihii ayaa la iibdhay asaga iyo saaxiibkiis ba, odayga dupqa ahaa.



Qof waliba muran ayuu bilaabay. "Waxa aynu ballan qaadnay in aan ilmaha iyo hooyadaba nabad gelyo siinno, waana in aan sidaas yeelnaa," qaar baa sidaa yiri. "Laakiin waxa ay noo horseedi doonaan nasiib darro!" qaar kale ayaa sidaa iyana yiri.



Sidaa darteed haweeneydii way cidlowday mar kale. Waxa ay ka la yaabaneyd wixii ay ku sameyn lahayd ilmahan qaabka daran. Waxa kale oo ay ka la yaabaneyd wixii ay iyaduna isku sameyn lahayd.



Meel kore oo daruuraha ka mid ah ayey hurdo kula dul dhaceen. Dameerkii waxa uu ku riyooday hooyadiis oo xanuunsanaysa oo isaga u yeeraysa. Markii uu toosay na...



Subax subaxyada ka mid ah, ayaal uu odagi! weyddiistay Damerkii in uu qaado buur dhaladeed.



Aakhirkii waxa ay isku qancisay in ay aqbasho in uu ilmahedi! yahay, iyaduna ay hooyadiis tahay.



Hada, hadii uu dameerka ku joogi lahaa sidiisi, bar yaraanta, wax walbo waxaan ahaan lahaayeen si ka duwan sidan. Laakiin ilmihii dameerka ahaa wuu koray oo koray ilaa uu la ekaan waayay dhabarkii hooyadii. Si kasta oo uu isku deyay na, waa uu u dhaqmi waayey sidii dadkii oo kale. Hooyadii aad bay u daashay oo waa ay isku buuqday. Marmar waxa ay isku dayday in uu sida xayawaanka u shaqeeyo.



Dameerkii waxa uu raacay si uu ula joogo odagii, kaas oo baray qaabab kala duwan oo ah sida loo noolaado. Dameerkii waxa uu noqday mid wax dhageystay oo na wax bartay, sidoo kale ayuu sameeyay odaygana. Waa ay is caawiyeen, waa ayna wada qosleen si wada jir ah.

Dameerki! waxa uu toosay isaga oo oday
la yaab leh hoos usoo eegayo. Indhihi
odayga ayuu eegay waxuu na billaabay
inyar oo rajo ah in uu dareemo.



Jahawareer iyo carro ayaa iskugu
darsantay dameerki!. Sidan ma yeeli karo
sidaana ma yeeli karo. Sidan ma noqon
karo sidaana ma noqon karo. Mar uu aad
u xanaaqay, ayaa uu maalin hooyadii laad
ku kiciyey oo dhulka ku tuuray.





Dameerkii ceeb ayuu dareemay. Waxa aanu bilaabay in uu aad u ordo oo uu u cararo meel fog.



Waqtigii uu joojiyay orodkii, habeen bay ahayd, Dameerkiina waa uu lumay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdigi uga dhex gunuunacay. “Haa’i Aaa?” ayuu mugdiga ka daba dhahay. Waaxuu ahaa mid cidloobay. Intuu isku duuduubay sidii kubad adag, ayuu la dhacay hurdo dheer oo dhiban.